

Miyaad wayday caymiskaagii caafimaad ee shaqadaada?

Waxaad u qalmi kartaa wakhtiga isdiiwaangelinta oo khaas ah si aad isugu diiwaangeliso caymiska caafimaadka gaarka loo leeyahay ee loo maro MNsure.

Waxa kale oo laga yaabaa inaad u qalanto caawimada maaliyadeed ee kaa caawinaysa in aad awoodo caymiska caafimaadka.

Waa maxay Wakhtiga Isdiiwaangelinta Gaarka ah?

Waa muddo ka baxsan wakhtiga isdiiwaangelinta furan taas oo adiga iyo qoyskaaguba aad isugu diiwaangelin kartaan caymiska caafimaadka khaaska ah sababta oo ah waxaad la kulantay dhacdooyinka nolosha ee u qalmitaanka qaarkood, sida in uu kaa dhamaaday caymis kale oo caafimaad ama isbeddel ku yimid tirada qoyska.

- Waxaad haysataa ilaa 60 maalmood inaad isku-diiwaangeliso.
- Waad dalban kartaa ka hor inta uusan kaa dhamaanin caymiskaaga shaqada si aad uga maaranto in aad noqoto caymis la'aan.
- Caymisku wuxuu bilaabanayaa maalinta koowaad ee bisha soo socota taariikhda aad dooratay qorshaha caymiskaaga (laakiin aan ahayn ka hor inta uusan caymiskaaga shaqadu dhammaanin).

Caymis Tayo leh

Qorshayaashu waxay bixinayaan caymiska caafimaadka aasaasiga ah sida daryeelka ka hortagga ah iyo adeegyada caafimaadka dhimirka, waxaana ku jira ilaalinta muhiimka ah oo macaamiisha, sida cayminta xanuunada hore u jiray.

Caawimo Maaliyadeed ayaa la Heli karaa

MNsure waa meesha kaliya ee aad xaq ugu yeelan karto caawimo maaliyadeed si loo yareeyo kharashkaaga. Iyada oo ay ku xirantahay dakhliga reerkaaga, waxaad helikartaa cashuur-dhimis, dhimis kharash-wadaag, ama waxaad u qalmi kartaa Medical Assistance (Gargaarka Caafimaadka) ama MinnesotaCare.

Sida la Isu-diiwaangaliyo

Talaabada 1: Ka soo qaado caddaynta dhamaanshaha caymiska loo shaqeeyahaaga Waxaad u baahan doontaa tan si aad u caddayso in aad u qalanto muddada isdiiwaangelinta khaaska ah iyo in la xaqiijiyo taariikhda aad u baahan tahay caymiskaaga cusub inuu bilowdo.

- Si aad u ogaato dukumiintiyada aad u baahan tahay MNsure.org ka raadi "lose coverage" (caymis ka dhamaaday).

Tilaabada 2: Miyaad horay MNsure akoon ugu lahayd/ama arji hore?

- **Haddii ay haa tahay, ama aadan hubin:** Ka soo wac Xarunta Xiriirka MNsure si lagaaga caawiyo 651-539-2099 (855-366-7873 meelaha ka baxsan Magaalooyinka Mataanaha ah).
- **Haddii ay maya tahay:** Booqo MNsure.org si aad u samaysato akoon aad ku dalbato oo aad isku diiwaangeliso. Marka aad dhamayso arjigaaga, waxaad arki doontaa tilmaamo ku saabsan sida caymiska la isugu diiwaangaliyo.

Ikhtiyaarka Isdiiwaangelinta Sannad-oo-dhan

Gargaarka Caafimaadka (Medical Assistance) iyo MinnesotaCare waxay bixiyaan caymis qiimo jaban oo loogu talagalay dadka reer Minnesota ee dakhligoodu hooseeyo. Haddii aad u qalanto mid ka mid ah barnaamijyadan, xili kasta waad isu-diiwaangelin kartaa. Xubnaha qabaa'ilka Hindi Mareykanka ee federaal ahaan loo aqoonsanyahay waxay xaq u leeyihiin inay isu-diiwaangeliyaan sanadka oo dhan.

Hel Caawio Bilaash ah

Dilaalada ay MNsure aqoonsantahay iyo hageyaasha ayaa kaa caawin kara buuxinta iyo isdiiwaangelinta.

Booqo MNsure.org/help/ si aad u hesho mid deegaankaaga ah.

www.MNsure.org
651-539-2099 ama 855-366-7873

